Qaraarka

2010/16

Xeerarka Qaramada Midoobay ee la Tacaalidda Maxaabiista Haweenka ah iyo Tallaabooyinka aan xarigga (xabsiga) ahayn ee lagu la dhaqmo Haweenka Dembiilayaasha ah (Xeerarka Bangkok)

Golaha Dhaqaalaha iyo Bulshada

Wuxuu Golaha Loo Dhanyahay *kula talinayaa* inuu ansixiyo qaraarkan qabyada ah ee soo socda:

" Golaha Loo Dhanyahay,

Isagoo xusuusan halbeegyada iyo xeerarka Qaramada Midoobay ee ka hortagga dembiyada iyo garsoorka dembiyada ee ugu horrayn la xiriira la dhaqanka maxaabiista, gaar ahaan Xeerarka Halbeegyada Ugu Yar ee la Dhaqanka Maxaabiista, [1] habraaca loo maro fulinta wax ku oolka ah ee Xeerarka Halbeegyada Ugu Yar ee la Dhaqanka Maxaabiista, [2] Isutagga Mabaadi'da Ilaalinta Dhammaan Dadka ku jira Cayn Kasta oo Xayiraad ama Xabsi ah [3] iyo Mabaadi'da Aasaasiga ah ee la Dhaqanka, [4]

Isagoo sidoo kale xusuusanaya halbeegyada iyo xeerarka Qaramada Midoobay ee ka hortagga dembiyada iyo garsoorka dembiyada ee ugu horrayn la xiriira waxyaabaha bedeli kara xabsiga, gaar ahaan Xeerarka Halbeegyada Ugu Yar ee Qaramada Midoobay ee Tallaabooyinka aan xabsiga ahayn (Xeerarka Tokyo) [5] iyo mabaadi'da aasaasiga ah ee ku saabsan isticmaalka barnaamijyada soo celinta caddaalada arrimaha dembiyada, [6]

Isagoo weli xusuusanaya qaraarkiisa tirsigiisu ahaa 58/183 ee soo baxay 22 Desembar 2003, ee uu ugu baaqay Dowladaha, hay'adaha caalamiga ah iyo kuwa gobolka ee ay arrintu khuseyso, hay'adaha qaran ee xuquuqda aadanaha iyo ururrada aan dawliga ahayn inay il gaar ah ku eegaan arrinta haweenka xabsiga ku jira, oo ay ka midyihiin carruurta haweenka xabsiga ku jira, iyadoo ay ujeeddadu tahay in la aqoonsado dhibaatooyinka ugu waaweyn iyo siyaabaha wax looga qaban karo,

---

1

2

3

4

5

6

Isagoo tixgelinaya waxyaabaha kale ee bedel ka noqon kara xabsiga sida ku qoran Xeerarka Tokyo, iyo isagoo tixgelinaya waxyaabaha u gaarka ah ee ay kala leeyihiin labada jinsi (rag iyo lab), iyo baahida ka dhalanaysa ee loo qabo in dhaqangelinta tallaabooyinka aan xabsiga ahayn, mudnaanta la siiyo haweenka uu xiriir kala dhexmaray nidaamka garsoorka dembiyada,

Isagoo maanka ku haya qaraarkiisa ee tirsigiisu yahay 61/143 ee soo baxay 19kii Desembar 2006, oo uu ugu baaqay dowladaha inay sameeyaan arrimo ay ka midyihiin inay qaadaan tallaabooyin wax ku ool ah ee wax looga qabto sababaha ka dambeeya tacaddiyada ka dhanka ah haweenka iyo inay xoojiyaan dadaalka ka hortagga ee wax looga qabto dhaqamada takoorka iyo caadooyinka bulshada, oo ay ku jiraan arrinta haweenka u baahan inay fiiro gaar ah ka helaan siyaasadaha horumarinta si wax looga qabto rabshadaha loo geysto haweenka ku jira xabsiyada ama meelo kale lagu hayo,

Isagoo sidoo kale maanka ku haya qaraarkiisa ee tirsigiisu yahay 63/241 ee soo baxay 24kii Desembar 2008, oo uu ugu baaqay dowladaha oo dhan inay il gaar ah ku eegaan saameynta uu xariga ama xabsiga waalidku ku yeelan karo carruurta iyo, gaar ahaan, inay aqoonsadaan sarena u qaadaan dhaqanka wanaagsan ee la xiriira baahida iyo koritaanka jirka, midka shucuurta, midka bulsho iyo midka nafsi ama maanka ee dhallaanka iyo carruurta uu saameeyay xabsiga ama xarigga,

Isagoo tixgelinaya Baaqa Vienna ee Dembiyada iyo Caddaalada: Wax ka qabadka Caqabadaha Qarniga Kow iyo Labaatanaad, [7] ee Dowladaha Xubnaha ka ah ay ku caddeeyeen sida ay uga go'antahay waxyaabo ay ka midyihiin horumarinta talooyin siyaasadeed ee wax qabad ku wajahan kuna saleysan baahida gaarka ah ee haweenka markay yihiin maxaabiis iyo dembiileyaal, iyo qorshe hawleedyo lagu hirgelinayo Baaqa, [8]

Isagoo xusuusinaya Baaqa Bangkok ee Wadashaqeynta iyo Wax qabadka: Isbahaysiga Istarateejiga ah ee Ka Hortagga Dembiyada iyo Garsoorka Dembiyada,[9] sida ay si gaar ah ula xiriirto haweenka xiran iyo kuwa ku jira goobaha xabsiyada aha iyo kuwa aan xabsiyada ahayn,

Isagoo xusuusanaya in Baaqii Bangkok, Dowladaha Xubnaha ka ah ay u soo jeediyeen Guddiga Ka Hortagga Dembiyada iyo Garsoorka Dembiyada inuu tixgeliyo dib u eegidda inay ku filanyihiin hal;beegyada iyo xeerarka marka la eego maareynta xabsiyada iyo maxaabiista,

Isagoo garowsaday tallaabada uu qaaday Guddoomiyaha Golaha Sare ee Xuquuqul Insaanka Qaramada Midoobay ee uu ugu aqoonsaday toddobaadka laga billaabo 6 ilaa 12 Oktoobar 2008 inuu noqdo Toddoobaadka Sharafta iyo Caddaalada La Haysteyaasha, taasoo si gaar ah loogu eegay xuquuqul insaanka haweenka iyo gabdhaha,

Isagoo tixgelinaya in haweenka maxaabiista ahi ay ka midyihiin kooxaha ugu nugul oo leh baahi iyo shuruurdo gaar ah,

---

7

8

9

Isagoo ka war haya in kuwo badan oo ka mid ah goobaha xabsiyada ah ee hadda ka jira adduunka oo idil markii hore loo qorsheeyay maxaabiista ragga ah, iyadoo tirada maxaabiista haweenka ahna ay aad u korodhay sannadihii la soo dhaafay,

Isagoo aqoonsan in tiro ka mid ah haweenka dembiileyaasha ah ayna khatar ku ahayn bulshada iyo, sida ay yihiin dhammaan dembiileyaasha kaleba, in xabsigoodu ka dhigi karo dhaqancelintooda bulsho mid aad u adag,

Isagoo soo dhoweynaya Buug Gacmeedka Maareeyeyaasha Xabsiyada iyo Siyaasiyiinta ee la xiriira Haweenka iyo Xabsiga ee uu diyaariyay Xafiiska Qaramada Midoobay ee Daroogada iyo Dembiyada, [10]

Isagoo sidoo kalena soo dhoweynaya casuumadda ku jirtay qaraarka Golaha Xuquuqul Insaanka ee tirsigiisu ahaa 10/2 of 25 ee soo baxay Maarso 2009 loona jeediyay dowladaha, hay'adaha caalamiga ah iyo kuwa gobolka ee ay arrintu khuseyso, hay'adaha xuquuqul insaanka qaran iyo ururrada aan dowliga ahayn inay dadaal dheeraad ah ku bixiyaan arrimaha haweenka iyo gabdhaha xabsiga ku jira, oo ay ka midyihiin arrimaha la xiriira carruurta ay dhaleen haweenka xabsiyada ku jira, iyadoo ujeeddaduna tahay in la aqoonsado waxna laga qabto dhinacyada iyo caqabadaha gaarka u ah haweenka ee la xiriira dhibaatadan,

Isagoo sidoo kalena soo dhoweynaya wadashaqeynta ka dhexeysa Xafiis Goboleedka Yurub ee Ururka Caafimaadka Adduunka iyo Xafiiska Qaramada Midoobay ee Daroogada iyo Dembiyada, garowsana Baaqii Kyiv ee Caafimaadka Haweenka Xabsiga ku jira,[11]

Isagoo garowsan Tilmaamaha Daryeelka Badiilka ah ee Carruurta, [12]

Isagoo xusuusanaya qaraarka Guddiga Ka Hortagga Dembiyada iyo Garsoorka Dembiyada ee tirsigiisu yahay 18/1 ee soo baxay 24kii Abriil 2009, ee Guddigu ka codsaday Agaasimaha Fulinta ee Xafiiska Qaramada Midoobay ee Daroogada iyo Dembiyada inuu sannadka 2009 isugu yeero kulan furan ee ay ka qaybgasho koox xeeldheerayaal ah oo dowladaha ka dhexeysa si loo dejiyo xeerar kaabayaal ah oo u gaar ah sida loola dhaqmo haweenka ku jira xabsi iyo goobaha xabsiga ah iyo kuwa aan xabsiga ahayn, iyadoo waafaqsan Xeerarka Halbeegyada Ugu Yar ee La Dhaqanka Maxaabiista iyo Xeerarka Tokyo, wuxuu soo dhoweeyay ballanqaadka ay bixisay Dowladda Thailand inay martigeliso kulanka kooxda xeeldheerayaasha, wuxuuna kulanka kooxda xeeldheerayaasha inay natiijada hawshooda u soo gudbiyaan Shirka Laba iyo Tobnaad ee Qaramada Midoobay ee Ka Hortagga Dembiyada Garsoorka Dembiyada, oo mar dambe lagu qabtay magaalada Salvador, ee Brazil, laga billaabo 12 ilaa 19 Abriil 2010,

Isagoo sidoo kale xusuusanaya in ka qaybgalayaasha afarta kulan goboleed ee hordhaca ah ee Shirka Laba iyo Tobnaad ee Qaramada Midoobay ee Ka Hortagga Dembiyada iyo Garsoorka Dembiyada ay soo dhoweeyeen diyaarinta xeerarka kaabayaasha ah ee u gaarka ah la dhaqanka haweenka ku jira xabsiga iyo kuwa lagu hayo goobaha xabsiga ah iyo kuwa aan xabsiga ahayn,[13]

10

11

12

13

Isagoo sidoo kale xusuusanaya Baaqii Salvador ee Istaraatijiyaadaha Buuxa ee ku aaddan Caqabadaha Caalamka: Nidaamyada Ka Hortagga Dembiyada iyo Garsoorka Dembiyada iyo in Lagu Hormariyo Caalam Isbedelaya, [14] ee Dowladaha Xubnaha ka ah ay talo ku soo jeediyeen in Guddiga Ka Hortagga Dembiyada iyo Garsoorka Dembiyada uu tixgeliyo qabyada Xeerarka Qaramada Midoobay ee La Dhaqanka Maxaabiista Haweenka ah iyo Tallaabooyinka aan Xabsiga ahayn ee ku aaddan Haweenka Dembiileyaasha ah, mudnaantana siiyo si tallaabo ku haboon looga qaado,

1. *Wuxuu u riyaaqsanyahay* hawsha kooxda xeeldheereyaasha, ay ku qabaty kulankeeda ka dhacay magaalada Bangkok laga billaabi 23 ilaa 26 Nofembar 2009, si loo dejiyo xeerar kaaba oo gaar u ah la dhaqanka haweenka xabsi ku jira iyo kuwa lagu hayo goobaha xabsiga ah iyo kuwa aan xabsiga ahayn, iyo natiijada kulankaas; [15]

2. *Wuxuu mahad u soo jeedinayaa* Dowladda Thailand oo martigelisay kulanka kooxda xeeldheereyaasha iyo taageerada dhaqaale ee ay ku bixisay abaabulka kulanka;

3. *Wuxuu guddoonsanayaa* Xeerarka Qaramada Midoobay ee La Dhaqanka Maxaabiista Haweenka ah iyo Tallaabooyinka aan Xabsiga ahayn ee ku aaddan Haweenka Dembiileyaasha ah, ee ku lifaaqan qaraarkan, wuxuuna ogolaanayaa talooyinka laga soo jeediyay Shirka Laba iyo Tobnaad ee Qaramada Midoobay ee Ka Hortagga Dembiyada iyo Garsoorka Dembiyada, Xeerarkana waa in lagu magacaabaa “Xeerarka Bangkok”;

4. *Wuxuu aqoonsanayaa* in, iyadoo la eegayo kala duwanaanshaha farabadan ee xaaladaha sharci, bulsho, dhaqaale iyo kuwa juqraafi ee ka jira caalamka, in xeerarka dhammaantooda aan si siman loogu dhaqangelin karin meel kasta iyo goor kasta, hase yeeshee waa inay noqdaan kuwo dhiirigeliya dhaqan joogta ah oo laga hortagayo dhibaatooyinka ka jira dhaqangelintooda, iyadoo la ogyahay inay, guud ahaan, yihiin himilooyin caalami ah oo waafaqsan yoolka guud ee hagaajinta natiijooyinka haweenka maxaabiista ah, carruurtooda iyo bulshooyinkooda;

5. *Wuxuu ku dhiirigelinayaa* Dowladaha Xubnaha ka ah inay dejistaan shuruuc lagu sameynayo nidaamyo bedel u noqon kara xabsiyada iyo inay mudnaanta siiyaan maalgelinta nidaamyadaas, iyo weliba dejiyaan hanaanka loogu baahanyahay hirgelintooda;

6. *Wuxuu ku dhiirigelinayaa* Dowladaha Xubnaha ka ah ee leh shuruuc, habraacyo, siyaasado ama hab dhaqamo hormarsan oo la xiriira haweenka xabsiyada ku jira ama waxyaabaha bedelka ka ah xabsiyada ee loo sameeyay haweenka dembiileyaasha ah inay xogta siiyaan dowladaha kale iyo ururrada caalamiga ha, urur goboleedyada iyo kuwa dowladaha ka dhexeeya, iyo weliba kuwa aan dowliga ahayn ee ay arrintu khuseyso, iyo inay gacan ka siiyaan dejinta iyo hirgelinta tababarro ama hawlo kale ee la xiriira shuruucdaas, habraacyadaas, siyaasadahaas amah ab dhaqameedyadaas;

7. *Wuxuu ugu yeerayaa* Dowladaha Xubnaha ka ah inay tixgeliyaan beehida gaarka ah iyo xaaladaha dhabta ah ee haweenka maxaabiista ah marka ay dejinayaan shuruucda, habraacyada, siyaasadaha iyo qorshe hawleedyada khuseeya iyo inay ku daydaan, hadba inta haboon, Xeerarka Bangkok;

14

15

8. *Wuxuu ugu yeerayaa* Dowladaha Xubnaha ka ah inay ururiyaan, kaydiyaan, falanqeeyaan, ayna faafiyaan, hadba inta haboon, xogta gaarka ah ee la xiriirta haweenka xabsiga ku jira iyo haweenka dembiyada gala;

9. *Wuxuu ku adkeynayaa*, marka la xukumayo ama la go'aaminayo tallaabooyinka ka horeeya maxkamadeynta haweeney uur leh ama qofka keliya ee daryeela ilmo, in tallaabooyinka aan xabsiga ahayn mudnaanta la siiyo haddii ay dhici karto ayna haboontahay, oo xukunka xabsiga ah la tixgeliyo keliya marka dembigu uu yahay mid khatar ah ama mid xoog jirka qofka loo geystay ah;

10. *Wuxuu ka codsanayaa* Xafiiska Qaramada Midoobay ee Daroogada iyo Dembiyada inuu taageero farsamo iyo adeegyo talo siiyo Dowladaha Xubnaha ka ah, markay codsadaan, si loo hormariyo ama loo xoojiyo, hadba sida haboon, shuruuc, habraacyo, siyaasado, iyo hab dhaqameedyo la xiriira haweenka xabsiga ku jira iyo nidaamyada bedel kara xabsiga haweenka dembiga gala;

11. *Wuxuu ka codsanayaa* Xafiiska Qaramada Midoobay ee Daroogada iyo Dembiyada inuu qaado tallaabooyin ku haboon si loo xaqiijiyo in si ballaaran loo faafiyo Xeerarka Bangkok, oo ah xeer kaabaya Xeerarka Halbeegyada Ugu Yar ee La Dhaqanka Maxaabiista [16] iyo Xeerarka Halbeegyada Ugu Yar ee Qaramada Midoobay ee Tallaabooyinka aan xabsiga ahayn (Xeerarka Tokyo, 81 iyo si loo xaqiijiyo sare u qaadidda hawlaha xogta ee arrintan;

12. *Wuxuu sidoo kale ka codsanayaa* Xafiiska Qaramada Midoobay ee Daroogada iyo Dembiyada inuu kordhiyo iskaashiga uu la leeyahay hay'adaha kale ee Qaramada Midoobay ee ay arrintu khuseyso, ururrada dowladaha ka dhexeeya, urur goboleedyada iyo ururrada aan dowliga ahayn ee ay iska kaashadaan kaalmada khuseysa oo la siiyo dalalka iyo inay aqoonsadaan baahida iyo tayada dalalka si loo kordhiyo iskaashiga ka dhexeeya dalalka iyo midka ka dhexeeya Koonfur-Koonfurta (dalalka soo koraya);

13. *Wuxuu ugu yeerayaa* hay'adaha Qaramada Midoobay ee sida gaarka ugu hawlan iyo urur goboleedyada, kuwa caalamiga ah, kuwa dowladaha ka dhexeeya iyo kuwa aan dowliga ahayn ee ay arrintu khuseyso inay ka qaybgalaan hirgelinta Xeerarka Bangkok;

14. *Wuxuu ugu yeerayaa* Dowladaha Xubnaha ka ah iyo deeqbixiyeyaasha kale inay deeq dheeraad ah oo ka baxsan miisaaniyadda ku bixiyaan ujeeddooyinkaas, si waafaqsan xeerarka iyo habraacyada Qaramada Midoobay.

16

LIFAAQ

Xeerarka Qaramada Midoobay ee La Dhaqanka Maxaabiista Haweenka ah iyo Tallaabooyinka aan Xabsiga ahayn ee ku aaddan Haweenka Dembiyada Gala (Xeerarka Bangkok)
Fiiro billow ah

1. Xeerarka Halbeegyada Ugu Yar ee la Dhaqanka Maxaabiista [17] waxaa lagu dhaqangelinayaa dhammaan maxaabiista iyagoon la kala soocin; sidaa awgeed, baahida gaarka ah iyo xaaladda dhabta ah ee dhammaan maxaabiista, oo ay ka midyihiin maxaabiista haweenka ah, waa in maanka lagu hayaa marka la dhaqangelinayo. Hase yeeshee, Xeerarka la ansaxiyay in ka badan 50 sanno ka hor fiiro ku filan ma siinin baahida gaarka ah ee haweenka. Iyadoo ay korodhay tirada haweenka maxaabiista ah adduunka oo idil, waxaa aad muhim u noqotay loona baahanyahay in si degdeg ah wax looga qabto baahida loo qabo in aad loo kala caddeeyo waxyaabaha loo baahanyahay in loo adeegsado la dhaqanka maxaabiista haweenka ah.

2. Iyadoo la garowsanyahay baahida loo qabo in la soo bandhigo halbeegyada caalamiga ah ee la xiriira tixgelin gaar ah ee loo baahanyahay in lagu dhaqangeliyo haweenka maxaabiista ah iyo dembiilayaasha, iyo iyadoo la tixgelinayo tiro ka mid ah qaraarrada arrintan khuseeya ee ay qaateen hay'adaha kala duwan ee Qaramada Midoobay, kuwaasoo Dawladaha Xubnaha ka ah loogu baaqay inay si haboon uga jawaabaan baahida haweenka dambiyada gala iyo maxaabiista, ayaa waxaa la sameeyey xeerarkan si loogu dhamaystiro looguna kaabo, hadba sida ku haboon, Xeerarka Halbeegyada Ugu Yar ee la Dhaqanka Maxaabiista iyo Xeerarka Halbeegyada Ugu Yar ee Qaramada Midoobay ee Tallaabooyinka aan Xabsiga ahayn (Xeerarka Tokyo) [18] ee la xiriira la dhaqanka haweenka maxaabiista ah iyo nidaamyada kale ee xabsi bedeli kara ee loogu talagalay dumarka dembiyada gala.

3. Xeerarkan sinaba uma badelayaan Xeerarka Halbeegyada Ugu Yar ee la Dhaqanka Maxaabiista ama Xeerarka Tokyo, sidaa darteedna, dhammaan qodobada la xiriira ee ku jira labadaas xeer ayaa weli lagu sii dhaqangelinayaa dhammaan maxaabiista iyo dembiilayaasha iyadoon la kala soocin. Iyadoo qaar ka mid ah xeerarkan ay kala caddayn dheeraad ah ku keenayaan qodobada hadda jira ee Xeerarka Halbeegyada Ugu Yar ee la Dhaqanka Maxaabiista iyo Xeerarka Tokyo sida loogu dhaqangelinayo haweenka maxaabiista ah iyo kuwa dembiyada gala, kuwa kale waxay daboolayaan dhinacyada cusub.

4. Xeerarkan waxay ka shidaal qaadanayaan mabaadi'da ku jira heshiisyada iyo baaqyada kala duwan ee Qaramada Midoobay, sidaa darteed, waxay waafaqsanyihiin qodobada sharciga caalamiga ah ee hadda jira. Waxaa loogu talagalay hay'adaha maxaabiista iyo garsoorka dembiyada (oo ay ka midyihiin siyaasiyiinta, sharcidejiyeyaasha, adeegga xeer ilaalinta, garsoorka iyo adeegga asluubta ama dabagalka maxaabiista la soo daayo) eek u lug leh maamulka ciqaabta aan xabsiga ahayn iyo tallaabooyinka bulshada ku saleysan.

5. Shuruudaha gaarka ah ee wax looga qabanayo xaaladda dumarka dembiilayaasha ah ayaa siyaabo kala duwan loogu adkeeyay Qaramada Midoobay. Tusaale ahaan, sannadkii 1980

17

18

Shirkii Lixaad ee Qaramada Midoobay ee Ka Hortagga Dembiyada iyo La Dhaqanka Dembiilayaasha ayaa soo saaray qaraar ku saabsan baahida gaarka ah ee dumarka maxaabiista ah, kaasoo lagu soo jeediyay in, marka la hirgelinayo qaraarrada ka soo baxay Shirka Lixaad ee si toos ah ama si dadban ula xiriira la dhaqanka dembiilayaasha, la aqoonsado dhibaatooyinka gaarka ah ee dumarka maxaabiista ah iyo baahida loo qabo in xal loo helo; iyo in dalalka aan weli sameynin ay samayn laga sameeyo barnaamijyo iyo adeegyo loo isticmaalo nidaam bedel ka ah xabsiyada loona diyaariyo haweenka dembiilayaasha si la siman dembiilayaasha ragga ah; iyo in Qaramada Midoobay, hay'adaha dowliga ah iyo kuwa aan dowliga ahayn oo wadatashi kula jira dhammaan ururada kale ee caalamiga ah, ay sameeyaan dadaal sii socda si loo xaqiijiyo in haweeneyda dembi gasha loola dhaqmo si caddaalad ah oo la siman marka la soo xirayo, la maxkamadeynayo, la xukumayo iyo marka xabsiga la geynayo, iyadoo fiiro gaar ah la siinayo dhibaatooyinka gaarka ah ee ay la kulmaan dumarka dembiyada gala, sida uurka iyo korinta ilmaha. [19]

6. Shirka Toddobaad, [20] Shirka Siddeedaad, [21] iyo Shirka Sagaal, [22] ayaa sidoo kale soo jeediyay talooyin gaar ah oo la xiriira haweenka maxaabiista ah.

7. Baaqii Vienna ee Dembiyada iyo Caddaalada: Ka Hortagga Caqabadaha Qarniga Kow iyo Labaatanaad, [23] oo sidoo kale lagu ansixiyay Shirkii Tobnaad, Dowladaha Xubnaha ka ah ayaa ku ballanqaaday inay maanka ku hayaan, waxna ka qabtaan wixii saameyn ah oo si gaar ah oo barnaamijyada iyo siyaasadaha u keenaan haweenka iyo ragga (faq. 11), taasoo ka mid ah barnaamijka Qaramada Midoobay ee ka hortagga dembiyada iyo garsoorka dembiyada, iyo weliba istaraatiijiyadaha qaran ee ka hortagga dembiyada iyo garsoorka dembiyada; iyo dejinta talooyin siyaasadeed ee hawl ku dheehan oo ku saleysan baahida gaarka ah ee haweenka maxaabiista ah iyo kuwa dembiyada gala (faq. 12). Qorshe hawleedyada hirgelinta Baaqii Vienna [24] waxaa ku jira qayb gooni ah (qayb. XIII) oo loogu talagalay tallaabooyinka sida gaarka ah loogu taliyay si loo dabagalo ballanqaadaydii lagu sameeyay faqradaha 11 iyo 12 ee Baaqa, oo ay ka midyihiin in Dowladaha dib u eegid ku sameynaya, qiimeynaya, haddii loo baahdana wax ka bedelaya dharcigooda siyaasadahooda, habraacyadooda iyo hab dhaqankooda la xiriira arrimaha dembiyada, si waafaqsan nidaamyadooda sharci, si loo xaqiijiyo in nidaamka garsoorka dembiyadu haweenka ula dhaqmaan si caddaalad ah.

8. Golaha Loo Dhanyahay, qaraarkiisa ee tirsigiisu yahay 58/183 ee soo baxay 22kii Desembar 2003, ee loogu magac daray "Xuquuqda aadanaha ee maamulka caddaaladda", ayaa ku baaqay in fiiro dheeraad ah lagu bixiyo arrinta haweenka xabsiga ku jira, iyadoo loogu gol leeyahay in lagu aqoonsado dhibaatooyinka muhiimka ah iyo siyaabaha wax looga qaban karo.

9. Golaha Loo Dhanyahay, qaraarkiisa ee tirsigiisu yahay 61/143 ee soo baxay 19kii Desembar 2006, ee loogu magac daray "Dardargelinta dadaallada lagu ciribtiro dhammaan noocyada rabshadaha ka dhanka ah haweenka", ayaa carrabka ku adkeeyay in "rabshadaha ka dhanka ah haweenka" waxaa loola jeedaa fal kasta oo ah rabshad ku saleysan jinsiga (raga/dumarka) oo ay ka dhalanayso ama laga yaabo inay ka dhalato dhib ku dhaca jirka, mid galmo ama maskaxda ama rafaad kale oo ku dhaca haweenka, oo ay ka mid tahay in si xaq darro ah xorriyadda looga qaado, ha ku dhacdo nolosha guud ama midda gaarka ah, wuxuuna Dowladaha uggu baaqay inay dib u eegid

19
20
21
22
23
24

ku sameeyaan, waxna ka bedelaan, hadba meesha haboon, ama baabi'iyaan dhammaan shuruucda, xeerarka, siyaasadaha, hab dhaqameedyada iyo caadooyinka takooraya haweenka ama saameyn takoor ah ku leh haweenka, iyo inay xaqiijiyaan in qodobada nidaamyada sharci ee farabadan, hadday jiraan, ay waafaqsanaadaan waajibaadka, ballanqaadyada iyo mabaadi'da caalamiga ah ee xuquuqul insaanka, oo uu ka midyahay mabda'a takoorid-la'aanta; inay qaadaan tallaabooyin wax ku ool ah oo wax looga qabanayo sababaha ka dambeeya rabshadaha loo geysto haweenka laguna xoojinayo dadaallada ka hortagga ee ku aaddan dhaqamada iyo caadooyinka bulshada ee takoorka ah, oo ay ka midyihiin haweenka u baahan fiiro gaar ah, sida haweenka ku jira xabsiyada ama goobaha kale ee lagu hayo; inyo inay siiyaan shaqaalaha sharci fulinta iyo garsoorka tababar iyo taya-dhis ku saabsan sinaanta ragga iyo dumarka iyo xuquuqda haweenka. Qaraarku waa garowsasho lagu aqoonsanayo xaqiiqda ah in rabshadaha ka dhanka ah haweenka ay saameyn gaar ah ku leeyihiin xiriirka ay haweenku la sameeyaan hay'adaha garsoorka, iyo weliba xaqa ay u leeyihiin inay xor ka noqdaan tacaddi kale inta ay xabsiga ku jiraan. Badbaadada jirka iyo maskaxda ayaa muhiim u ah xaqiijinta xuquuqda aadanaha iyo wanaajinta natiijooyinka ay helaan haweenka dembiyada gala, taasoo xeerarkan ay tixgelinayaan

.

10. Ugu dambeyntii, Baaqii Bangkok ee Iskaashiga iyo Falcelinta: Isbahaysiga Istaraatiijiga ah ee Ka Hortagga Dembiyada iyo Garsoorka Dembiyada, ee lagu ansaxiyay Shirka Kow iyo Tobnaad ee Qaramada Midoobay ee Ka Hortagga Dembiyada iyo Garsoorka Dembiyada 25kii bishii Abriil 2005, 60 ka mid ah Dowladaha Xubnaha ka ah ayaa ku dhawaaqay inay ka go'antahay horumarinta iyo ilaalinta hay'ado garsoor dembi oo cadaalad ah oo waxtar leh, oo ay ka midtahay in si naxariis leh oo baniaadanimo ku jirto loola dhaqmo dhammaan dadka ku sugan xabsiyada ka horeeya maxkamadeynta, si waafaqsan halbeegyada caalamiga ah ee dhaqangalka ah (faq. 8); waxayna talo ku soo jeediyeen in Guddiga Ka Hortagga Dembiyada iyo Garsoorka Dembiyada uu tixgelin siiyo dib u eegidda in halbeegyada iyo xeerarka la xiriira maareynta xabsiyada iyo maxaabiista ay yihiin kuwo ku filan (faq. 30).

11. Sida ay yihiin Xeerarka Halbeegyada Ugu Yar ee la Dhaqanka Maxaabiista, iyadoo la eegayo kala duwanaanshaha badan ee xaaladaha sharci, bulsho, dhaqaale iyo kuwa juqraafi ee ka jira caalamka oo dhan, waxaa cad in dhammaan xeerarka soo socda aan si isku mid ah loogu dhaqangelin karin goob kasta iyo goor kasta. Hase yeeshee, waa inay dardargeliyaan dadaal joogta ah oo lagaga gudbayo dhibaatooyinka dhabta ah sida loo dhaqangeliyo, aqoonta ay ka tarjumaan, guud ahaan, himilooyinka caalamka ee ay Qaramada Midoobay u aragto inay yihiin kuwo u horseeda himilada guud ee hagaajinta natiijooyinka ay filanayaan haweenka maxaabiista, carruurtooda and bulshadooda.

12. Qaar ka mid ah xeerarku waxay wax ka qabanayaan arrimo khuseeya maxaabiista ragga ah iyo kuwa haweenka ah labadaba, oo ay ka midyihiin kuwa la xiriira mas'uuliyaadka waalidka, qaar ka mid ah adeegyada caafimaadka, habraacyada barista iyo wixii la mid ah, inkastoo xeerarku ay inta badan ku saabsanyihiin baahida haweenka iyo carruurtooda. Hase ahaatee, maadaama dadka diiradda la saarayo ay ka midyihiin carruurta hooyooyinka xabsiga ku jira, waxaa jirta baahi loo qabo in la aqoonsado kaalinta udub dhexaadka ah ee ay labada waalid ku leeyihiin nolosha carruurta. Markaa, qaar ka mid ah xeerarka waxaa si isku mid ah loogu dhaqangelinayaa maxaabiista ragga ah iyo aabbeyaasha dembiyada gala.

Hordhac

13. Xeerarka soo socda sinaba uma bedelayaan Xeerarka Halbeegyada Ugu Yar ee la Dhaqanka Maxaabiista iyo Xeerarka Tokyo. Sidaa darteed, dhammaan qodobada ku jira labada xeer waxay sii ahaanayaan kuwo ku dhaqangala dhammaan maxaabiista iyo dembiilayaasha iyadoo aan la takooraynin.

14. Qaybta I ee xeerarkan, oo ka hadlaya maamulka guud ee hay'adaha, waxaa lagu dhaqangelinayaa dhammaan qaybaha haweenka laga xannibay xoriyaddooda, oo ay ku jiraan haween maxaabiis ah oo dembiileyaasha ah ama madani ah, kuwa aan la maxkamadeyn ama kuwa la xukumay, iyo weliba haweenka u xiran "tallaabooyin ammaan" awgood ama tallaabooyin dhaqancelin ama sixitaan ah oo uu amray garsoore.

15. Qaybta II waxaa ku jira xeerar lagu dabaqi karo oo keliya qaybaha gaarka ah ee looga hadlay qodob hoosaad kasta. Si kastaba ha ahaatee, xeerarka hoos yimaada qodob hoosaadka A, ee khuseeya maxaabiista xukuman, ayaa sidoo kale loogu dabaqi doonaa qaybaha maxaabiista looga hadlay qodob hoosaadka B, haddii ay aan ka hor imanayn xeerarka xukuma qaybtaas haweenka ayna dantoodu ku jirto.

16. Qodob hoosaadyada A iyo B labaduba waxay keenayaan xeerarka dheeraadka ah oo ku lug leh la dhaqanka gabdhaha da’yarta ah ee maxaabiista ah. Hase aheetee, waxaa muhiim ah in la ogaado in istaraatijiyad gooni ah iyo siyaasado waafaqsan halbeegyada caalamiga ah, gaar ahaan Xeerarka Halbeegyada Ugu Yar ee Qaramada Midoobay ee Maamulka Caddaaladda Dhallinyarada (Xeerarka Beijing), [25] Tilmaamaha Qaramada Midoobay ee Ka Hortagga dibjirnimada Dhallinyarada (Tilmaamaha Riyadh), [26] Xeerarka Qaramada Midoobay ee Ilaalinta Dhallinyarada Laga Xanibay Xoriyaddooda[27] iyo Tilmaamaha Hawsha Laga Qabanayo Carruurta Ku Jirta Nidaamka Caddaaladda Dembiyada, [28] waa in loo qorsheeyaa la dhaqanka iyo dhaqancelinta noocan maxaabiista ah, halka loo baahanyahay in laga fogaado hay’adaynta inta ugu badan ee suurtogalka ah.

17. Qaybta III waxaa ku jira xeerar ka hadlaya in ciqaabta iyo tallaabooyin aan xabsiga ahayn lagu dabaqo dumarka iyo dhallinyada dembiyada gala, oo ay ka midtahay in la soo xiro iyo maxkamadeynta ka hor, xumumidda iyo marxalada xukunka ka dambeysa ee hanaanka caddaalada dembiyada.

18. Qeybta IV waxaa ku jira xeerar ku saabsan cilmi-baaris, qorshayn, qiimayn, wacyigelin dadweyne iyo isweydaarsiga xogta, waxaana lagu dabaqaa dhammaan qaybaha haweenka dembiyada gala ee xeerarkan hoos yimaada.

25

26

27

28

I. Xeerarka dhaqangelinta guud

1. Mabda’a asaasiha ah

[*Wuxuu dhammeystiraya xeerka 6 ee Xeerarka Halbeegyada Ugu Yare e La Dhaqanka Maxaabiista*]

Xeerka 1

Si loogu dhaqmo mabda'a takoor la’aanta, ee ku dheehan xeerka 6 ee Xeerarka Halbeegyada Ugu Yare e La Dhaqanka Maxaabiista, waa la tixgeliyaa baahiyaha gaarka ah ee haweenka maxaabiista ah marka la dhaqangelinayo xeerarka. In baahiyaas la tixgeliyo si loo gaaro sinaan jinsi oo la taaban karo waa inaan la arkin inay tahay mid takoorka ah.

Xeerka 2

1. Fiiro ku filan waa in la siiyaa habraacyada aqbalka haweenka iyo carruurta marka la geynayo xabsiga, maxaa yeelay si gaar ah ayay ugu nugulyihiin waqtigan. Haweenka maxaabiista ah ee dhowaan yimid waxaa loo fududeyn doonaa inay la xiriiraan qaraabadooda; inay helaan adeeg qareen; xog ku saabsan xeerarka xabsiga, nidaamka xabsiga iyo meesha ay kaalmo ka heli karaan marka ay u baahdaan, waxaana loogu sheegayaa af ay garanayaan; iyo weliba haddii ay yihiin muwaadiniin u dhashay dal shisheeye, inay helaan wakiil ka socda qulsulkooda/safaaradooda.
2. Ka hor ama marka lagu aqbalayo xabsiga, haweenka mas’uulka ka ah daryeelka carruur waxaa loo ogolaan doonaa inay carruurtaas qorshe u dejiyaan, taasoo ay ka midtahay iniay dhici karto in xabsiga si macquul ah loo laalo, iyadoo maanka lagu hayo danta carruurta.

3. Diiwaangelin

[*Wuxuu dhammeystiraya xeerka 7 ee Xeerarka Halbeegyada Ugu Yare e La Dhaqanka Maxaabiista*]

Xeerka 3

1. Tirada iyo faahfaahinta gaarka ah ee carruurta haweeneyda xabsiga la keenayo waa in diiwaangeliyaa marka waqtiga la keenayo. Diiwaangelintu waxaa ka midnoqonaya, iyadoo aan dhib loo geysan xuquuqda hooyada, ugu yaraan magacyada carruurta, da'dooda iyo, haddii ayna la socon hooyada, meesha ay joogaan iyo xaaladda waalidka wakiilka ka ah.
2. Dhammaan xogta la xiriirta aqoonsiga carruurta si qarsoodi ah ayaa loo keydiyaa, isticmaalka xogtaasna waa inuu mar kasta waafaqsanyahay shuruudda ah in danaha carruurta la tixgeliyo.

4. Ku qoridda xabsiga

Xeerka 4
Haweenka maxaabiista ah waa in lagu qoraa, hadba inta suurtagal ah, xabsiyada ugu dhow gurigooda ama meesha bulsho ahaan loogu dhaqancelinayo, iyadoo la tixgelinayo mas'uuliyadahooda daryeel, iyo weliba waxyaabaha ay haweeney si gaar ah u doorbidayso iyo barnaamijyada iyo adeegyada haboon ee la heli karo.

5. Nadaafadda qofka
[*Wuxuu dhammeystiraya xeerarka 15 iyo 16 ee Xeerarka Halbeegyada Ugu Yare e La Dhaqanka Maxaabiista*]

Xeerka 5
Goobta la dejinayo haweenka maxaabiista ah waa inay lahaato qalabka iyo agabka lagama maarmaanka u ah baahida nadaafadda gaarka ah ee haweenka, oo ka midyihiin suufka nadaafadda dumarka oo si lacag la'aan ah loo siiyo iyo biyo joogta ah oo loo diyaariyo daryeelka shakhsi ee carruurta iyo haweenka, gaar ahaan haweenka wax karsada iyo kuwa uurka ah, naas nuujinaya ama dhiigga caadada qaba.

6. Adeegyada daryeelka caafimaadka
[*Wuxuu dhammeystiraya xeerarka 22 ilaa 26 ee Xeerarka Halbeegyada Ugu Yare e La Dhaqanka Maxaabiista*]

(a) Baarista caafimaad markay soo galayaan
[*Wuxuu dhammeystiraya xeerka 24 ee Xeerarka Halbeegyada Ugu Yare e La Dhaqanka Maxaabiista*]

Xeerka 6
Baarista caafimaad ee haweenka maxaabiista ah waxaa midnoqonaya baaris dhammeystiran si loo go'aamiyo baahida caafimaad ee asaasiga ah, waxaana lagu go'aaminayaa:
(a) Inay jiraan cudurada galmada la isugu gudbiyo ama cudurada dhiigga ku jira; haweenka maxaabiistana waxaa laga baari karaa feyruuska HIV, hadba sida ay khatar ugu suganyihiin, iyadoo la siinayo la talin ka horeysa kana dambeysa baarista;
(b) Baahida caafimaadka maskaxda, oo ay ka midyihiin welwelka ka dambeeya shaqaaqadaha (PTSD) iyo khatarta isdilka iyo dhib kale oo qofku isu geysto;
(c) Taariikhda caafimaad ee taranka haweenka maxaabiista ah, oo ay ka midyihiin uurka hadda jira iyo mid dhowaan ahaa, ilmo dhalmo iyo arrin kastoo la xiriirta caafimaadka taranka;
(d) Inay jirto ku tiirsanaan daroogada ah;
(e) Tacaddi galmo iyo tacaddiyo kale ee loo geystay ka hor intaan xabsiga la keenin.

Xeerka 7
1. Haddii la ogaado inay jiraan tacaddi galmo ama tacaddiyo kale ee loo geystay ka hor ama marka xabsiga la keenayo, haweenka maxaabiista ah waa in loo sheegaa xaqa ay u leeyihiin inay gar ka helaan hay'adaha garsoorka. Haweenka maxaabiista ah waa in si buuxda loogu wargeliyaa habraacyada iyo tallaabooyinka la qaadayo. Haddii haweenka maxaabiista ah ay ogolaadaan inay qaadaan tallaabo sharci, shaqaale ku haboon waa in la wargeliyaa, dacwadana si degdeg ah loogu wareejiyaa hay'adaha khuseeya si ay u baaraan. Hay'adaha xabsiga waa inay haweenkaas gacan ku siiyaan inay helaan kaalmo qareen.
2. Haddii ay haweenku doortaan ama ayna dooranin inay qaadaan tallaabo sharci, hay'adaha xabsiga waa inay dadaal ku bixiyaan si ay u xaqiijiyaan inay si degdeg ah ku helaan taageero ama la talin maskax oo leh takhasus gaar ah.
3. Waa in tallaabooyin gaar ah la diyaariyaa si looga fogaado nooc kasta oo ah aargoosi ka dhan ah kuwa sameeya warbixin sidaa oo kale ah ama qaada tallaabo sharci ah.

Xeerka 8
Xaqa haweenka maxaabiista ah ay u leeyihiin inay qarsoodi u ahaadaan wixii ku saabsan caafimaadka, oo uu ka midyahay si gaar ah xaqa ay u leeyihiin inaysan xogta la wadaagin iyo in aan la marin baaris la xiriirta taariikhda caafimaadka tarankooda, waa in waqti kasta la ixtiraamo.

Xeerka 9
Haddii haweeneyda maxbuuska ahi ay ilmo wadato, ilmaha waxaa la marin doonaa baaris caafimaad, waxaana wanaagsan inuu mariyo dhakhtar carruur, si loo ogaado baahida caafimaad loona daweeyo. Waa in la siiyo daryeel caafimaad ku haboon, ugu yaraan midka bulshada u dhigma.

(b) Daryeel caafimaad oon haweenka u gaar ah

Xeerka 10
1. Adeegyo daryeel caafimaad oo haweenka u gaar ah oo ugu yraaan u dhigma kuwa laga helo bulshada ayaa la siin doonaa haweenka maxaabiista ah.
2. Haddii haweeneyda maxbuuska ahi codsato inay baarto ama daweyso dhakhtar ama kalkaaliso haweeney ah, waxaa loo diyaarin doonaa haweeney dhakhtar ama kalkaaliso ah hadba inta suurtagal ah, haddayna ahayn xaaladaha u baahan daaweyn degdeg ah. Haddii hawlwadeen caafimaad oo lab ah uu baarista sameeyo taasoo ka soo horjeedda rabitaanka haweeneyda maxbuuska ah, haweeney shaqaale ah ayaa la joogeysa marka baarista la sameynayo.

Xeerka 11

1. Only medical staff shall be present during medical examinations unless the doctor is of the view that exceptional circumstances exist or the doctor requests a member of the prison staff to be present for security reasons or the woman prisoner specifically requests the presence of a member of staff as indicated in rule 10, paragraph 2 above.
2. If it is necessary for non-medical prison staff to be present during medical examinations, such staff should be women and examinations shall be carried out in a manner that safeguards privacy, dignity and confidentiality.

(c) Caafimaad maskaxeed iyo daryeel

Xeerka 12
Daryeel caafimaad maskaxeed oo dhammeystiran, oo qofka u gaar ah, haweenka il gaar ah ku eega, dhibaatadana ka jawaabaya iyo barnaamijyo dhaqancelin ayaa loo diyaarin doonaa haweenka maxaabiista ah oo leh baahida daryeel caafimaad maskaxeed ee xabsiyada ama goobaha aan xabsiga ahayn.

Xeerka 13
Shaqaalaha xabsiga waa in lagu wargeliyaa waqtiyada ay haweenku dareemi karaan culeys dhibaato gaar ah, si ay u digtoonaadaan xaaladahooda una xaqiijiyaan in haweenka la siiyo taageero ku haboon.

(d) Ka hortagga, daaweynta cudurka HIV, daryeelka iyo taageerada dadka qaba

Xeerka 14
Marka la diyaarinayo wax ka qabashada cudurka HIV/AIDS ee xabsiyada, barnaamijyada iyo adeegyadu waa inay ka ka jawaabaan baahida gaarka ah ee dumarka, oo ay ka midtahay in laga hortago inay hooyadu cudurka ilmaha u gudbiso. Xaaladdan oo kale, maamulka xabsiga waa inuu dhirrigelinayaa, isla markaasna taageeraa horumarinta dadaallada ka hortagga, daaweynta iyo daryeelka cudurka HIV, sida waxbarashada asxaabta ku-saleysan.

(e) Barnaamijyada daaweynta si xun u adeegsiga daroogada

Xeerka 15
Adeegyada caafimaadka xabsiyada waa inay bixiyaan ama fududeeyaan barnaamiyo daaweyn oo takhasus leh oo qorsheeyay haweenka maandooriyaha si xun u isticmaala, iyadoo maanka lagu hayo dhibaatooyinkii horey loogu geystay, baahida gaarka ah ee haweenka uurka ah iyo haweenka carruurta haysta, iyo weliba kala duwanaanshaha dhaqan ee ay la yimaadeen.

(f) Ka hortagga isdilka iyo dhib isu geysiga

Xeerka 16
Qayb ka mid ah siyaasadda buuxda ee daryeelka caafimaadka maskaxeed ee xabsiyada haweenka waa inay noqdaan horumarinta iyo hirgelinta istaraatijiyado lagaga hortagayo isdilka iyo dhib isu geysiga haweenka maxaabiista ah, taageero khaas ah, ku haboon, haweenkana u gaar ah lagu siinayo kuwa khatarta ku jira, iyadoo lala kaashanayo adeegyada daryeelka caafimaadka maskaxda iyo daryeelka bulshada.

(g) Adeeyyada daryeelka caafimaadka ka hortagga ah

Xeerka 17
Haweenka maxaabiista ah waxay heli doonaa waxbarasho iyo xog la xiriirta tallaabooyinka daryeelka caafimaadka ka hortagga ah, oo ay ka midyihiin ka hortagga cudurada HIV, cudurada galmada la isugu gudbiyo iyo cudurada kale ee dhiigga lagu sido, iyo weliba xaaladaha caafimaadka haweenka u gaarka ah.

Xeerka 18
Tallaabooyinka daryeelka caafimaadka ka hortagga ah ee si gaar ah u khuseeya haweenka, sida baarista Papanicolaou ama kankarka madaxa minka haweeneyda iyo baarista kankarka naasaha iyo dhalmada, waa in la siiyaa haweenka maxaabiista ah si la siman haweenka ay isku da’da yihiin ee bulshada.

7. Bed-qabka iyo Amniga

[Wuxuu dhamaystir u yahay xeerarka 27 ilaa 36 ee Xeerarka Ugu Yar ee Halbeegga Qaramada Midoobay ee La Dhaqanka Maxaabiista]

(a) Baaritaanka

Xeerka 19

Waa in la qaado tallaabooyin wax ku ool ah si loo hubiyo ilaalinta sharafta iyo xushmadda haweenka maxaabiista ah inta lagu guda jiro baaritaanada qof qofka ah, taas oo ay fulin karaan oo kaliya shaqaalaha haweenka ah ee sida habboon loogu tababaray habka baaritaanada ee waafaqsan habraacyada jira.

Xeerka 20

Waa in la horumariyaa habab kale oo baaritaan, sida baaritaanka loo adeegsado qalabka (Scan), si looga maarmo habka baaritaan ee dhar-siibidda ah ee jirka oo dhan la baaro. Haddii la helo hababka Scan-ka, waxaa laga fogaanayaa saamayn maskaxeed ama mid jir ahaaneed oo ka dhalan lahayd habka baarista jirka.

Xeerka 21

Shaqaalaha xabsigu waa inay muujiyaan karti, xirfad iyo dareen, waana inay ilaaliyaan sharafta iyo xushmadda marka ay baaritaanno ku samaynayaan caruurta la joogta waalidkooda maxaabiista ah iyo caruurta booqanaysa maxaabiista xabsiga ku jira.

(b) Anshaxa iyo Ciqaabta

[Waxuu dhamaystir u yahay xeerarka 27 ilaa 32 ee Xeerarka Ugu Yar ee Halbeegga Qaramada Midoobay ee La Dhaqanka Maxaabiista]

Xeerka 22

Haweenka uurka leh, kuwa haysta ilmaha yaryar iyo kuwa naas-nuujinaya ee xabsiga ku jira looma adeegsan karo ciqaabta xabsi ku keli yeelidda ah iyo anshax marinta ku dhisan gooni usaarista maxbuuska.

Xeerka 23

Haweenka xabsiga ku jira ee la marinayo xayiraadda ku salaysan anshaxa waa in aan laga mamnuucin xiriirka ay la samaynayaan qoysaskooda, gaar ahaan caruurtooda.

(c) Qalabka Xakamaynta

[Wuxuu dhamaystir u yahay xeerarka 33 iyo 34 ee Xeerarka Ugu Yar ee Halbeegga Qaramada Midoobay ee La Dhaqanka Maxaabiista]

Xeerka 24

Qalabka xakamaynta waa in aan marnaba loo adeegsanin haweenka xiliyada ay foolanayaan, dhalayaan iyo dhalmada kadib.

(d) Warbixinta la siinayo maxaabiista iyo cabashaday ay soo gudbiyaan; kormeer

[Wuxuu dhamaystir u yahay xeerarka 35 iyo 36, iyo arrimaha ku saabsan kormeerka ee ku xusan qodobka 55 ee Xeerarka Ugu Yar ee Halbeegga Qaramada Midoobay ee La Dhaqanka Maxaabiista]

Xeerka 25

1. Haweenka ku jira xabsiga ee ka sheegta xadgudub, waa inay helaan dhowrid degdeg ah, la taageero loona fidiyaa la-talin, waana in cabashadooda lagu sameeyaa baaritaan ay fulinayaan hay'ado madaxbanaan oo awood u leh, iyadoo si buuxda loo ixtiraamayo mabda'a ku salaysan qarinta xogta u gaarka ah qofka. Marka la qaadayo tallaabooyinka ilaalinta waa in lagu xisaabtamaa suurta ganmada fal-celin aargoosi.

2. Haweenka la kulmay xadgudub ku salaysan jinsiga, gaar ahaan kuwa arrinkaas ku qaaday uur, waa inay helaan la-talin iyo talo caafimaad oo ku habboon xaaladdooda waana in la siiyaa daryeelka caafimaad ee ay u baahdaan ee xagga maskaxda iyo jirkaba, waana inay helaan taageero iyo kaalmo sharci.

3. Si loola socdo xaaladaha ka dhexjira xabsiyada iyo sida loola dhaqmo haweenka xabsiga ku jira, waa in xubno haween ah ay kamid noqdaan kormeerayaasha, guddiyada booqanaya ama kor-joogtada ah ama guddiga kormeerka.

8. Xiriirka lala samaynayo wixii debedda ka ah ee ka baxsan xabsiga.

[Wuxuu dhamaystir u yahay xeerarka 37 ilaa 39, iyo arrimaha ku saabsan kormeerka ee ku xusan qodobka 55 ee Xeerarka Ugu Yar ee Halbeegga Qaramada Midoobay ee La Dhaqanka Maxaabiista]

Xeerka 26

Waa in la dhiirigeliyaa si walba oo suurtogal ahna loo fududeeyaa xiriirka haweenka maxaabiista ahi ay la yeelanayaan caruurtooda, caruurta ay sii dhaleen iyo qareenada u doodaya. Haddii ay suurto galayso, waa in la qaadaa tallaabooyin la iskugu dheeli-tirayo dhibaatooyinka ay la kulmaan haweenka ku jira xabsiyada ku yaalla meelo ka fog guryohooda.

Xeerka 27

Marka la ogolyahay in xaasaska is qaba ay isasoo booqdaan, waa in haweenku ay xuquuqdaas ugu naaloodaan si la siman raga.

Xeerka 28

Booqashada ay ku lug leeyihiin caruurta waa in u dhacdaa si u qalanta oo wanaagsan, waxaana kamid ah waxyaabaha loo baahanyahay in shaqaalaha (xabsigu) la yimaadaan dabeecado wanaagsan, waana in loo ogolaadaa in haweenku ay ilmohooda la yeeshaan xiiir toos ah. Haddii ay suurtogal tahay, waa in la dhiirigeliyaa in haweenku ilmohooda la qaataan waqti badan.

9. Shaqaalaha xabsiyada iyo tababarkooda

[Wuxuu dhamaystir u yahay xeerarka 46 ilaa 55 Xeerarka Ugu Yar ee Halbeegga Qaramada Midoobay ee La Dhaqanka Maxaabiista]

Xeerka 29

Tayo-dhiska shaqaalaha ka shaqeeya xabsiyada haweenka waa inay noqotaa mid awood u siinaysa wax ka qabashada shuruudaha gaarka ah ee is dhexgalka bulshada ee ay u baahanyihiin haweenka maxaabiista ah, sidoo kale waa in tayo-dhiskaasi uu awood u siinayo shaqalaha inay si bedqabta u maareeyaan xarumaha dhaqan celinta. Tayo-dhiska shaqaalaha haweenka ah waa inay kamid noqotaa helitaan ay helaan jagooyin sar sare oo leh mas'uuliyado sare oo xagga horumarinta siyaasadaha iyo istiraatiijiyada la xiriirta la-dhaqanka iyo xanaanada haweenka maxaabiista ah.

Xeerka 30

Waa in maamulka xabsiyadu ay si cad oo joogto ah u ballabn qaadaan ka hortagga iyo wax ka qabashada takooridda ku qotonta dhedig-labka ee ka dhanka ah haweenka shaqaalaha ah.

Xeerka 31

Waa in la horumariyaa lana dhaqangeliyaa siyaasado iyo shuruuc cad cad oo ku saabsan habdhaqanka shaqaalaha xabsiyada lana xiriirta sida haweenka maxaabiista ah ay ku helayaan ilaalo buuxda oo laga ilaalinayo xadgudub ku qotoma dhedig-labka, ha ahaado eray ama ficil, xadgudub iyo dhibaatayn jinsi.

Xeerka 32

Haweenka ka shaqeeya xabsiyada waa inay tababarrada u helaan si la siman raga ka shaqeeya xabsiyada, waana in dhamaan inta ku shaqada leh maamulka xabsiyada haweenka ay helaan tababar ku saabsan muhiimadda arrimaha la xiriira dhedig-labka iyo mamnuucidda takoorka iyo dhibaataynta jinsiga.

Xeerka 33

1. Dhamaan shaqaalaha u xilsaaran la-shaqaynta haweenka maxaabiista ah waa inay helaan tababar ku saabsan baahida gaarka ah ee la xiriirta arrimaha dhedig-labka iyo xuquuqul insaanka haweenka maxaabiista ah.
2. Gargaarka degdega ah daawda asaaska ah ka sokow, shaqaalaha xabsiyada ee ka shaqeeya xabsiyada haweenka waa inay helaan tababarro asaasi ah oo ku saabsan arrimaha ugu waawayn ee xagga caafimaadka haweenka.
3. Marka loo ogolaado caruurtu inay la joogaan hooyooyinkooda xabsiga ku jira, waa in shaqaalaha xabsiga ay la siiyaa wacyigelin la xiriirta horumarinta caruurta, sidoo kalena la siiyaa tababar ku saabsan caafimaadka caruurta si markaasi ay (shaqaaluhu) sida ku habboon ay wax uga qabtaan marka ay baahi timaado ama degdeg loogu baahdo adeegooda.

Xeerka 34

Waa in manhajka tababarka shaqalaha xabsiyada lagusoo daraa tababaro asaasi ah oo ku saabsan HIV. Ka-hortagga HIV/AIDS kasokow, waa in manhajka lagusoo daraa arrimaha la xiriira dawaynta, xanaanaynta yo taageeridda sida arrimaha dheddig-labka iyo xuquuqul insaanka, iyadoo si gaar ah diiradda loo saaraayo xiriirka arrimahaasi la leeyihiin HIV, faquuqidda iyo takooridda.

Xeerka 35

Shaqaalaha xabsiyada waa in loo tababaraa qaabka lagu ogaado xanuunada maskaxda iyo khaarta is-daldalaadda iyo qoka oo naftiisa gooya, waana in shaqaala xabsiyada ay arrimahaas ogaan karaan haddii ay ka dhexjiran haweenka maxaabiista ah, waana in shaqaaluhu ay kaalmo ka geysan karaan arrimahaas, una sii gudbin karaan dadka ku taxasusay.

10. Gabdhaha maxaabiista ah ee dad’da yar

Xeerka 36

Mas’uuliyiinta xabsiyada waa inay diyaariyaan qaabka loo marayo ilaalinta gabdhaha da’da yar ee xabsiyada ku jira

Xeerka 37

Gabdhaha da’da yare e xabsiyada ku jira waa inay si lasiman sida ragga da’da yar ee xabsiyada ku jira ay u helaan waxbarashada iyo tababarrada xirfadeed.

Xeerka 38

Gabdhaha da'da yare e xabsiyada ku jira waa inay helaan adeegyada iyo barnaamijyada da'dooda loogu talo galay sida la-talinta ku saabsan arrimaha xadgudubka jinsiga. Waa inay si la siman haweenka waawayn u helaan waxbarasho ku saabsan caafimaadka haweenka, waana in si joogto ah ay u arki karaan dhakhaatiirta qaabilsan caafimaadka haweenka.

Xeerka 39

Gabdhaha dhalinyarada ah ee uurka leh kuna jira xabsiyada waa inay helaan taageero iyo xaanaano caafimaad oo lamid ah tan ay helaan haweenka kale. Waa in caafimaadkooda uu kor kala socdaa dhakhtar ku takhasusay arrimaha caafimaadka. Sababo la xiriira da'dooda oo yar, waa in maanka lagu haya inay la kilmi karaa khatar caafimaad oo ka dhalata uurka.

II. Xeerarka ku habboon qaybaha gaarka ah

A. Maxaabiista xukuman

1. Abla-ablaynta iyo ka saarista shaqsiyaadka

[Wuxuu dhamaystir u yahay xeerarka 67 ilaa 69 ee Xeerarka Ugu Yar ee Halbeegga Qaramada Midoobay ee La Dhaqanka Maxaabiista]

Xeerka 40

Maamulka xabsiyadu waa inay horumariyaan oo ay dhaqangeliyaan habka abla-ablaynta ee wax looga qabanayo baahiyaha gaarka ah ee la xiriira arrimaha dhedig-labka iyo xaaladaha haweenka maxaabiista ah, si loo xaqiijiyo qorshe haboon oo si shaqsi shaqsi ah loogu qabanayo haweenka ku jira qaybaha hore ee dhaqancelinta iyo dib ugu noqoshada bulshada.

Xeerka 41

Abla-ablaynta iyo qiimaynta muhiimadda ay leeyihiin arrimaha dhedig-labka maxaabiista waa inay kamid noqdaan:

(a) Waa in la tixgeliyaa in guud ahaan khatarta hamwwenku u geysan karaan haweenka kale ee ay xabsiga iskula jiraan, waana in si gaar ah loogu sii xisaabtamaa waxyeelada iyo dhimaatada ee tallaabooyinka amniga ee adag iyo gooni u-soociddy ay ku yeelan karaan haweenka (haddii lagula dhaqmo);

(b) Inta ay socoto go'aan ka gaarista xukunka, waa in la tixgeliyaa warbixinnada ku saabsan haweenka iyo taariikhdooda hore, sida haddii ay horay ula kulmeen xadgudubyo, xanuun xagga dhimirka ah iyo isticmaalka maandooriyaha, sidoo kale waa in loo tixgeliyaa haweenka maxaabiista ah haddii ay saarantahay mas'uuliyad waalidnimo ama mid xanaanayn;

(c) Waa in la xaqiijiyaa in qorshaha xukumidda haweenka lagusoo daro barnaamijyo iyo adeegyo dhaqancelin oo la jaan-qaadaya baahidooda gaarka ah ee la xiriirta arrimaha dhedig-labka
(d) Waa in la xaqiijiyaa in haweenka qaba xanuun dhimirka ahla siiyaa hoy aan xakamaysnayn, ilaalada la duldhigayana ay ahaato heerka ugu hooseeya ee suurto gal ah, waana inay helaan dawayn ku habboon xaaladohooda. Ma aha in lagu hayo meel ilaaladeedu aad u sarreyso, sababtoo ah waxay qabaan xanuun dhimirka ah.

2. Maamulka xabsiga

[Wuxuu dhamaystir u yahay xeerarka 65, 66 iyo 70 ilaa 78 ee Xeerarka Ugu Yar ee Halbeegga Qaramada Midoobay ee La Dhaqanka Maxaabiista]

Xeerka 42

1. Haweenka maxaabiista ah wa inay si isku-dheelitiran oo dhamaystiran u helaan hawlaha iyo barnaamijyada (socda) ee tixgelinta lagu siinayo hadba baahida la xiriirta arrimaha dhedig-labka.
2. Maamulka xabsigu waa inuu ahaadaa mid dabacsan oo ka jawaaba baahida ay qabaan haweenka uurka leh, kuwa naas nuujinaya iyo kuwa caruurta haysta. Waa in la diyaariyaa meelo lagu xanaaneeyo caruurta oo ku dhexyaal xabsiyada si haweenka maxaabiista ahi uga qaybqaataan hawlaha xabsiga.
3. Waa in dadaal dheeri ah la geliyaa sidi barnaamijyo ku habboon loogu heli lahaa haweenka xabsiga ku jira ee uurka leh, kuwa naas nuujinaya iyo kuwa haysta caruurta.
4. Waa in dadaal gaar ah loo galaa sidi adeegyo ku habboonoo lagu taageero haweenka maxaabiista ah ee qaba baahida nafsaaniga ah (psychological need), gaar ahaan kuwa la kulmay xadgudub jinsi, mid maskaxeed ama jir ahaaneed.

Xiriirka bulshada iyo sii joogtaynta xanaanada

[Wuxuu dhamaystir u yahay xeerarka 79 ilaa 81 ee Xeerarka Ugu Yar ee Halbeegga Qaramada Midoobay ee La Dhaqanka Maxaabiista]

Xeerka 43

Madaxda xabsiyadu waa inay dhiirigeliyaan, haddii ay suurtogal tahayna ay fududeeyaan booqashada loogu tegayo haweenka maxaabiista ah, taas oo shardi muhiim ah u ah faya-qabkooda iyo dib ugu noqoshada bulshada.

Xeerka 44

Iyadoo la fiirinayo kala duwanaanshaha heerarka tacadiyada ka dhaca qoysaska gudohooda ee ay la kulmaan haweenka, waa in hawenka maxaabiista ah waa la-tashi ku habboon lagala sameeyaa qodfa (ay u ogolyihiin) inay soo booqato

Xeerka 45

maamulka xabsiyadu waa inay ka faa'iidaystaan fursadaha sida fasaxa, xabsiyada furan, goobaha barashada arrimaha bulshada iyo barnaamijyada adeegyada bulshada si haweenka maxaabiista ah, sida ugu macquulsan, ay ugusii gudbaan helidda xornimadooda, ugana yaraado dareenka ay dareemayaan in laga faquuqay bulshada inteeda kale, ayna dib ugusoo ceshadaan xiriirki ay la lahaayeen qoysaskooda, waana arrintaasi inay dhacdaa marxaladaha ugu horreeya ee suurtogalka ah.

Xeerka 46

Maamulka xabsiyadu waa inay qaabeeyaan oo ay dhaqangeliyaan barnaamijyo dib isku dhexgelid bulsho oo dhamaystiran, lana qabanayo kahor inta aan maxaabiista xabsiga lagasii daynin iyo kadibba, iyadoo lala kaashanayo adeegyada carbinta iyo/ama daryeelka bulshada, ururada deegaanka, hay'adaha aan dowliga ahayn.

Xerka 47

Si loo xaqiijiyo in haweenka xabsiga lagasii daayay ay si guul leh ugu dhex milmaan bulshada, waa in taageero dheeri ah loo fidiyaa haweenka xabsiga lagasii daayay ee u baahan caawimaad maskexeed (psychology), mid caafimaad, mid sharci iyo mid waxqabad, iyadoo lala kaashanayo adeegyada bulshada.

3. Haweenka xabsiga ku jira ee uurka leh, kuwa nuujinaya iyo kuwa haysta caruurta

   [Wuxuu dhamaystir u yahay xeerka 23 ee Xeerarka Ugu Yar ee Halbeegga Qaramada Midoobay ee La Dhaqanka Maxaabiista]

Xeerka 48

1. Haweenka uurka leh iyo kuwa naaska nuujinaya waa inay helaan talooyin khuseeya caafimaadkooda iyo quudintooda, waxaana talooyinkaas lagu bixinayaa barnaamij ay soo diyaariyeen, dushana kala socdaan dhakhaatiir takhasus u leh arrimaha caafimaadka. Waa in haweenka uurka leh, ilmaha yaryar, ilmaha rooroon iyo haweenka naaska nuujinaya ay helaan cunto ku filan oo waqtigeeda ay helaan, sidoo kale waa inay helaan jawi caafimaad leh iyo jimicsi joogto ah, waana in waxyaabahaas dhamaantood lagu bixiyaa si lacag la'aan ah.
2. Haweenka maxaabiista ah waa in aan laga niyad jebinin naasnuujinta caruurtooda haddii aanay jirin sababo caafimaad oo gaar ah oo khasbaya in la joojiyo naasnuujinta.

3. Barnaamijka dawaynta (baxnaaninta) waa in lagusoo daraa haweenka umusha ah ee aan caruurtooda ku haysanin xabsiga dhexdiisa una baahan dawo iyo nafaqo.

Xeerka 49

Go'aanka loogu ogolaanayo caruurta inay hooyooyinkooda kula noolaadaan xabsiga dhexdiisa, waa in go'aankaasi lagu saleeyaan maslaxadda ugu wanaagsan ee caruurta. Caruurta xabsiga dhexdiisa kula nool hooyooyinkooda marnaba loolama dhaqmi kari sida maxaabiis oo kale.

Xeerka 50

Haweenka caruurtooda ku haysta xabsiga dhexdiisa waa in sida ugu macquulsan loo siiyaa fursadda ugu ballaaran ee ay waqti kula qaadan karaan caruurtooda.

Xeerka 51

1. Caruurta hooyooyinkooda kula nool xabsiga dhexdiisa waa inay helaan adeegyo caafimaad oo joogto ah, waana in horumarkooda ay la socdaa khubaro caafimaad oo kaashanaya adeegyada caafimaad ee bulshada.
2. Jawiga ay caruurtaasi ku korayaan waa inuu yahay mid hadba sidii macquul ah ugu dhow kan ay ku noolyihiin caruurta banaanka ku nool (xabsiga banaankiisa).

Xeerka 52

1. Go'aanka laga gaarayo in la kala geeyo ilmaha iyo hooyadood waa in lagu saleeyaa qiimayn shakhsiyadeed iyo danta ugu wanaagsan ee ilmaha, iyadoo loo marayo sharciyada dalka u degsan ee khuseeya arrimahaas.
2. Marka ilmaha laga saarayo xabsiga waa in si dareen ku dheehanyahay looga saaraa, waxayna ku dhici kartaa oo kaliya marka ilmaha loo helo meel kale oo ay ku noolaadaa. Haddii (hooyooyinka xabsiga ku jira) ay yihiin dad ajaanib ah, waxaa lala tashanayaa madaxda qunsuliyadaha ama safaaradaha ee wadamad ay kasoo jeedaan.
3. Marka ilmaha iyo waalidkood la kala geeyo, ee ilmahana lagu wareejiyo qoys, qaraabo ama meel kale oo ilmuhu ku helayaan xanaano, waa in haweenka maxaabiista ah lasiiyaa fursadda ugu macquulsan loona fududeeyaa lakulanka caruurtooda, waa marka ay sidaasi kujirto danta ugu wanaagsan ee ilmaha, xaaladda amnigana ay saamaxdo.

4. Dadka shisheeyaha ah

[Wuxuu dhamaystir u yahay xeerka 38 ee Xeerarka Ugu Yar ee Halbeegga Qaramada Midoobay ee La Dhaqanka Maxaabiista]

Xeerka 53

1. Haddii ay jiraan heshiisyo khuseeya arrinkan oo laba geesood ah ama dhinacyo badan ka dhexeeya, waa in laga fikiraa gudbinta haweenka maxaabiista ah ee ajaanibta ah ee aan dalka ku lahayn deganaansho, loona gudbiyaa wadamadooda, gaar ahaan haddii ay caruur u joogaan wadamadooda. Usii gudbinta wadamadooda waxaa la tixgelinayaa inta ay xabsiga qaadanayaan, kadib marka haweenka arrinkaasi khuseeyo ay soo codsadaan sidaasi ama ay kusoo wargeliyaan maamulka.
2. Marka xabsiga laga saarayo ilmo xabsiga dhexdiisa kula nool hooyadood oo aan deganaansho kulahayn dalka, waa in tixgelin la siiyaa gudbinta ilmaha loo gudbinayo dalkooda hooyo iyadoo la tixgelinayo danta ugu wanaagsan ee ilmaha, iyo la-tashi lagala samaynayo hooyada.

5. Dadka laga tirada badanyahay iyo dadka deegaanka

Xeerka 54

Maamulka xabsiiyadu waa inay garwaaqsadaan in haweenka maxaabiista ah ee kala haysta diimaha iyo dhaqamada kala duwan ay baahiyohooduna kala duwanyihiin ayna wajihi karaan faquuqid noocyo kala duwan ah marka ay raadsanayaan adeegyada iyo barnaamijyada u baahan in loo eego dhaqanka iyo dheddig-labka. Sidaasi si lamid ah, maamulka xabsiyadu waa inay bixiyaan adeegyo iyo barnaamijyo dhamaystiran oo wax looga qabanyo baahiyahaas, iyadoo lala tashanayo haweenka maxaabista ah nafsaddooda iyo hay'adaha kale ee ku habboon.

Xeerka 55

Waa in dib u eegis lagu asmeeyaa adeegyada la siinayo haweenka maxaabiista ah, kahor inta aan xabsiga lagasii daynin iyo kadibba, si loo hubiyo adeegyadu inay yihiin kuwo haboon oo ay heli karaan haweenka maxaabiista ah ee deegaanka kasoo jeeda iyo kuwa qowmiyad ahaan iyo jinsi ahaanba u dhashay deeegaanka, iyadoo lala tashanayo hay'adaha ku habboon.

B. Maxaabiista xiran ama gar sugayaasha ah

[Wuxuu dhamaystir u yahay xeerarka 84 ilaa 93 ee Xeerarka Ugu Yar ee Halbeegga Qaramada Midoobay ee La Dhaqanka Maxaabiista]

Xeerka 56

Hay'adaha ku shaqada leh waa inay garwaaqsadaan khatarta xadgudubka ee haweenku kala kulmi karaan xabsiga lagu xiro kahor inta aan la maxkamadayn. Hay'adahaasi waa inay meelmariyaan sharciyada ku habboon ayna dhaqangeliyaan damaanadqaadka la

damaanadqaaddayo bed-qabka iyo amaanka haweenkaas. (Sidoo kale eeg xeerka 58 ee hoos ku qoran ee la xiriira hababka kale ee xabsi ku haynta maxkamadda kahor)

III. Xukunnada aan xabsiga ahayn

Xeerka 57

Qodobada ku qoran Xeerarkii Tokyo ayaa hagaya horumarinta iyo dhaqangelinta tallaabooyinka ku habboon haweenka dambiilayaasha ah. Waa in Wadamada Xubnaha ka ah Xeerka Tokyo ay shuruucdooda (ku daraan) kuna horumariyaan tallaabooyin kala du-duwan oo la kala dooran karo oo la xiriira xukumidda iyo weliba xabsiga ka horreeya maxkamadaynta.

Xeerka 58

Iyadoo maanka lagu hayo qodobada xeerka 2.3 ee Xeerkii Tokyo, Haweenka dambiilayaasha ah lagama soo dhexsaari karo qoysaskooda iyo bulshooyinka ay la noolyihiin iyadoo aan tixgelin la siinin taariikhdooda hore iyo xiriirka kala dhexeeya qoysaskooda. Waa in la dhaqangeliyaa, hadba intii suurtogal ah, qaabab kale oo loo maareeyo arrimaha haweenka dambiilayaasha ah, sida tallaabooyin kala duwan iyo xukuno kale (oo aan xabsi ahay).

Xeerka 59

Guud ahaan, waa in la adeegsadaa hababka aan xabsiga ahayn, tusaale ahaan hoyga ay maareeyaan hay'adaha madaxabanaan, ururada bulshada iyo hay'adaha bixiya adeega bulshada, si markaasi haweenka u baahan hooygaasi ay u adegsadaan. Tallaabooyin kumeelgaar ah oo xabsiguna kamid yahay, si loogu ilaaliyo haweenka, waxaa la adeegsan karaa oo kaliya marka ay muhiin noqoto, ayna sidaasi soo codsato haweenka ay arrintu khusayso, mar walibana waxaa kormeer ku samaynaya hay'adda garsoorka ama hay'ado kale oo awood u leh. Tallaabooyinkaas ilaalinta ah lamasii wadi karo haddii aanay ku qanacsanayn haweenka ay arrintu khusayso.

Xeerka 60

Waa in dhaqaale ku habboon loo helaa sidi xal kala duwan loogu heli lahaa haweenka dambiilayaasha ah, si markaasi la iskugu dhafo tallaabooyinka aan xabsiga ahayn iyo wax ka qabashada arrimaha ugu wawayn ee keenaya in haweenka lala xiriiriyo nidaamka garsoorka dambiyada. Waxaa kamid noqon kara koorsooyin dawayn iyo talo siin ah oo loo fidiyo dhibanaha dhibka qoyska iyo xadgudub jinsi; daawayn ku haboon oo la siiyo qofka qaba xanuunka dhimirka; barnaamijyo waxbarasho iyo tababarro lagu horumarinayo shaqooyinkooda mustaqbalka. Barnaamijyadaasu waa inay tixgeliyaan baahida loo qabo in la helo adeegyo xanaanayn oo u gaar ah haweenka iyo caruurta.

Xeerka 61

Marka la xukumayo haweenka dambiilayaasha ah, maxkamaduhu waa inay awood u leeyihiin tixgelinta tallaabooyinka lagu khafiifin karo xukunka, sida in aanu horay u jirin fal-dembiyeed iyo debcinta ku habboon xukunka iyo qaabka uu u dhacay fal-dembiyeedka iyadoo la eegayo mas'uuliyadaha xanaanaynta ah (ee saran haweenka dambiilayaasha ah) iyo taariikhdooda hore.

Xeerka 62

Waa in la horumariyaa barnaamijyo wax loga qabanayo kuna saabsan muhiimadda arrimaha dheddig-labka, saska, maandooriyaha haweenku isticmaalaan, iyadoo looga dan leeyahay in looga hortago fal-dembiyeedyada iyo weliba in la kala duwo xukunada oo noocyo kala duwan ay noqdaan.

1. Habdhaqanka ka dambeeya xukunka

Xeerka 63

Go'aamada la xiriira sii daynta hormariska ah ee shuruudaha wata (parole), waa in si waafaqsan loogu tixgeliyaa mas'uuliyadaha xanaanaynta ah ee saran haweenka maxaabiista ah, iyo weliba baahiyaha gaarka ah ee ay qabaan lana xiriira dib ugu milmiddooda ay dib ugu milmaan bulshada.

2. Haweenka uurka leh iyo kuwa ay caruuri ku tiirsanyihiin

Xeerka 64

Marka la xukumayo haweenka uurka leh iyo kuwa ar caruur ku tiirsanyihiin, waxaa la door bidayaa, hadba intii ku haboon ee suurto gal ah, xukunada aan xabsiga ahayn, xukunka xabsiga ah waxaa la cuskanayaa marka fal-dembiyeedku yahay mid halis ah ama rabshad wata, ama haweenta la xukumayo ay tahay khatar joogto ah, waxaana la cuskanayaa xukunkaas xabsiga ah kadib marka la darso danta ugu wanaagsan ee caruurta, iyadoo si haboon loo xaqiijinayo heltaanka xanaanada ay u baahanyihiin caruurtaas.

3. Gabdhaha dambiilayaasha ah ee da'da yar

Xeerka 65

Ilaa iyo xad intii macquul ah waa in laga fogaadaa in caruurta lala tiigsado sharcica. U-nuglaanta gabdhaha da'da yare e dambiilayaasha ahi ay u nugulyihiin arrimaha la xiriira dheddig-labka waa in iyadana la tixgeliyaa marka go'aan la gaarayo.

4. Muwaadiniinta u dhashay wadamada shisheeye

Xeerka 66

Dadaal buuxa waa in loo gala sidi lagu ansixin lahaa Heshiiska Qaramaa Midoobay eek a dhanka ah Fa—debiyeedyada Abaabulan ee guaha Dlka. Iyo Heshiiska Ka-hortagga, Baabi'inta iyo Ciqaabidda Ka-ganacsiga Dadka ee gudaha Xabsiga, Gaar ahaan, (ka ganacsiga) Haweenka iyo Caruurta. Waxaa Heshiisyadan lagusii kabayaa in si buuxda loo fuliyo qodobadooda si dhibanayaasha la kulmay ka ganacsiga dadka ay u helaan ilaalin buuxda, loogana fogaado in haween badan oo ajaanib ah ay labaad la kulmaan dhibaatadaas.

IV. Cilmi-baaris, qorshayn, qiimayn iyo wacyi-gelin bulsho

1. Cilmi-baaris, qorshayn iyo qiimayn

Xeerka 67

Waa in dadaal loo galo sidi loo abaabuli lahaa loona horumarin lahaa cilmi-baaris dhamaystiran oo natiijo leh oo lagu sameeyo dambiyada ay geystaan haweenka, sababaha keena in haweenku la baratamaan hay'adda cadaaladda dembiyada, saamaynta ay yeelan karto in haweenka mar labaad dembi lagusoo oogo oo la xabiso, dabeecadaha ay leeyihiin haweenka dambiilayaasha ah, iyo weliba barnaamijyada loogu talo galay dhimista dembiyada ay mar kale geystaan haweenka. Cilmi-baaristaas waxay saldhig u noqon kartaa qaabaynta qorshe wax ku ool ah, horumarinta barnaamijyo iyo siyaad oo looga jawaabayo baahida xagga dib ugu milmidda bulshada ee ay qabaan haweenka dambiilayaasha ah.

Xeerka 68

Waa in dadaal loo gala sidi loo abaabuli lahaa loona horumarin lahaa cilmi-baaris ku saabsan tirada caruurta ah ee saamaynta ay ku yeesheen hooyooyonkooda oo la baratamay amah or tegay hay'adaha adaaadda ee dembiyada, gaar ahaan xabsiga ay galeen hooyooyinkooda, iyo saamaynta arrintani ku yeelatay caruurta, si markaasi talooyin iyo fikrado loogu biiriyo qaabaynta siyaasadda iyo horumarinta barnaamijyada, iyadoo la eegayo danta ugu muhiimsan ee caruurta.

Xeerka 69

Waa in dadaal loo galaa in si xilliyaysan dadka loogusoo bandhigo isbedellada, isla markaasina dib u eegis iyo qiimayn agu sameeyo dhibaatooyinka iyo sababaha la xiriira habdhaqanka dembiyada ee haweenka, iyo wax ku oolnimada jawaabaha laga bixiyo baahida dib ugu milmidda bulshada ee ay qabaan haweenka dembiyada geystay, iyo weliba baahida caruurta, si loo yareeyo faquuqidda iyo saamaynta xun ee hortegidda haweenkaasi ay hortageen cadaaladda ay ku reebi karto caruurta.

2. Wacyi-gelinta bulshada, wadaagidda xogta iyo tababarka

Xeerka 70

1. Warbaahinta iyo dadweynahaba waa in lagu wargeliaa sababaha keena in haweenku xabsi mutaystaan marka loo eego sharciga cadaaladda dembiyada, sidoo kale waa in lagu wargeliyaa sida ugu haboon ee wax looga qaban karo, si markaasi haweenku ugu awood helaan inay dib ugu milmaan bulshada, iyadoo la tixgelinayo danta ugu wanaagsan ee caruurta.
2. Daabacaadda iyo qeybinta natiijooyinka cilmi-baarista iyo tusaalooyinka dhaqanka wanaagsan waa inay waa inay qayb muhiim ah ka noqdaan siyaasadaha loogu talo galay horumarinta natiijooyinka iyo cadaalad u samaynta haweenka iyo caruurtooda marka jawaab la siinayo haweenka dembiyada geystay.
3. Warbaahinta, dadweynaha iyo qof kasta ee mas'uuliyad ka saarantahay arrimaha haweenka maxaabiista ah waa in warbixin dhab ah oo joogto ah laga siiyaa arrimaha ku xusan xeerarkan iyo sida loo dhaqangeliyo.
4. Waa in la horumariyaa lana dhaqangeliyaa barnaamijoyo tababar oo ku saabsan xeerka jira iyo natiijada kasoo baxda cilmi-baarista, waana in markaasi kadib lala wadaago oo loo gudbiyo madaxda qaabilsan cadaladda dembiilayaasha sis are loogu qaado wacyigooda, isla markaasina loola socodsiiyo qodobada halkan ku xusan.

Shirkii guud ee 45aad

22 July 2010